Osloskolen

Oslo

Oslo, 02.05.2023

Ku waalidka ardayda iskoolka billaabaysa iyo kuwa fasallada 1.– 3. ee iskoollada Oslo ee sanad dugsiyeedka 2022/2023

**BOOS BAR AH OO BILAASH AH EE OO ISKOOLKA FIRFIRCOONIDA (AKS) LAGA SIINAYO FASALLADA 1.-4. SANAD DUGSIYEEDKA 2023/2024**

Dhammaan carruurta dhigata fasallada 1.-4., waxaa boos bar ah oo bilaash ah laga siinayaa Iskoolka firfircoonida (AKS) sanad dugsiyeedka 2023/2024. Waxaa booska la siinayaa laga billaabo bisha ogoosto 2023.

**Waa maxay booska barka ah ee bilaashka ah ee AKS?**

- 12 saac oo si siman maalmaha loogu qaybinayo iskoolka kaddib.
  Taas oo sare u qaadaysa tayada deeqda, ardaydana u fududaynaysa in si wanaagsan wax loo qorsheeyo.
- 2 maalin toddobaadkii inta lagu jiro fasaxyada iskoolka. Fasaxa dayrta iyo jiilaalka, fasaxa ciidda masiixiga iyo midka booskaha iyo mid kasta oo ka mid ah toddobaadyada fasaxa xagaaga marka laga reebo bisha luuliyo. (AKS waa xiran yahay bisha luuliyo).
- Maalin bar ah maalmaha qorshaynta ee iskoolka ama maalmaha u dhexeeya maalmaha fasaxa ah ee sanad dugsiyeedka. AKS wuxuu maalmaha qorshaynta iskoolka dartood u xirnaan karaa sanadkiiba ilaa iyo laba maalmood.

Haddii aad doonaysaan in uu ilmuhu ka qaybqaato deeqda AKS ee ilmaha waxbarashada laga caawinayo oo dhan, waxaad codsan kartaan boos buuxa oo qiimahiisa la dhimay.

**Boos buuxa oo qiimahiisa la dhimay**

Qiimaha booska buuxa wuxuu ku xiran yahay dakhliga waalidka ilmaha, qiimihiisuna wuxuu noqon doonaa ilaa iyo 1108 karoon bishiiba. Ilmaha boos buuxa ka haysta AKS wuxuu halkaas joogi karaa iskoolka ka hor iyo kaddib labadaba, wuxuuna joogi karaa maalmaha oo dhan marka uu iskoolku xiran yahay (marka laga reebo bisha luuliyo).

**Sida soo socota ayaad boos uga codsan kartaa AKS**

Waalidka doonaya in ay ilmo ku daraan AKS waxay isticmaalayaan bogga internetka ee degmada Oslo www.oslo.kommune.no/skole-og-utdanning/aktivitetsskolen/sok-plass-pa-aktivitetsskolen. Warbixin intaan ka badan oo ku saabsan iskoollada bixiya boos AKS oo bar ah oo bilaash ah ka eeg https://www.oslo.kommune.no/skole-og-utdanning/aktivitetsskolen/gratis-deltidsplass/

**Ka qaybqaadashada oo sare loo qaado iyo aqoonta luuqadda oo la xoojiyo**

AKS waa goob waxbarasho oo kale taas oo ciyaar iyo waxbarasho lagu xoojin doono horummarka carruurta ee dhinaca maaddo iyo midka bulsho. AKS wuxuu bixinayaa deeq dhammaystiran ayada oo iskoolka la kaashanayo.
Halkaan ka akhriso waxa ay deeqdu ka kooban tahay:

- Manhajka SFO-ga
- Hagayaasha ka yaalla AKS ee Oslo
- Hagaha wadashaqaynta guriga-iskoolka

Hadafka laga leeyahay booska barka ah ee bilaashka ah ee AKS waa in:

- Sare loo qaado ka qaybqaadashada AKS
- La xoojiyo aqoonta luuqadda ee ardayga
- Sare loo qaado tayada AKS lana hubiyo in ay ardaydu helaan deeq isku tayo ah

Iskoolka la xiriir haddii aad wax su’aal ah qabto.

Mahadsanidiin
**Dugsiyada Oslo**